U.S. Department of Homeland Security

U.S. Citizenship and Immigration Services

Qiraalka Ballanta ee Xarunta Taageerada Dalabka USCIS (Somali)

USCIS waxa dhici karta inay rabaan inaad timaado waraysi ama bixiso sawirka farah, sawirro, iyo/ama saxeex wakhti aad doonto si aad u caddayso aqoonsigaaga, helaan macluumaad dheeraad ah, oo samayeen hubino sooyaalka iyo ammaanka, oo ay kujirto hubin diiwaanada taariikhda dambiilemimo ee ay hayso FBI-du, kahor intayna go'aan ka qaadan dalabkaaga. Kadib marka USCIS ay helaan dalabkaaga oo ay xaqiijiyaan inuu dhammaystiran yahay, waxaanu qoraal kuugu wargelin doonaa (ama ogaysiis iimayl haddii dalabkaaga aad elektarooni ahaan u fayl garaysatay), haddii aad u baahan tahay inaad xaadirto ballan adeegyada baayometriga. Haddii ballan daruuri tahay, ogaysiisku wuxuu ku siin doonaa goobta deegaankaaga ama meesha loogu talogalay Xarunta Taageerada Dalabka USCIS (ASC) iyo taariikhda iyo wakhtiga ballantaada. Haddii aad ku hoobato inaad xaadirto ballantaada adeegyada baayometriga, USCIS waxa dhici karta inay diidaan dalabkaaga.

Dib-u-eeg USCIS ee Qiraalka ASC ee hoos ka muuqata. Ujeedada qiraalkan waa in la xaqiijiyo inaad dhammaystirtay dalabkaaga, dib-u-eegto jawaabahaaga, oo aad caddayso in macluumaadka aad adigu bixisay oo ay dhammaystiran yihiin, run yihiin, oo sax yihiin. Haddii qofi kaa caawiyey buuxinta dalabkaaga, qofkaasi waa inuu dib-u-eego qiraalka isaga iyo adiguba si aad u hubisaan inaad fahamteen.

Aniga oo ah, [DOE JOHN], in ujeedada ballanta) USCIS ASC ay tahay inaan bixiso sawirka faraha, sawirro, iyo/ama saxeex, iyo inaad dib-u-xaqiijiyo in dhammaan macluumaadka dalabkayga ku qoran ay dhammaystiran yihiin, run yihiin, oo sax yihiin aniguna aan bixiyey. Waan fahamsanahay inaan saxeexi doono magacayga shaacinta soo socota kaasi oo USCIS ay i tusi doonto wakhtiga aan bixinayo sawirkayga faraha, sawirrada, iyo/ama saxeexa marka ballantayda USCIS ASC.

Saxeexistayda halkan, waxaan shaacinaya sida uu dhigayo xeerka ciqaabta been-abuurku inaan dib-u-eegay oo aan fahmay dalabkayga ama codsiga sida ku cad lambarka qabashada ee ka muuqda shaashadda sare, iyo dhammaan dokumentiyada caddaynaya, dalabyada ama codsiyada la fayl garaysan dalabkayga in aniga (ama qareenkayga ama wakiilkayga sharciga ah) aan ka fayl gareeyey USCIS, iyo in dhammaan macluumaadka ku qoran waxyaalahan ay dhammaystiran yihiin, run yihiin, oo sax yihiin.

Sidoo kale waxaan fahamsanahay in marka aan saxeexo magayga, aan bixiyo sawirkayga faraha, iyo/ama sawir laga igaga qaaday USCIS ASC, aan dib-u-xaqiijin doono in ikhtiyaarkayga aan ku gudbiyo dalabkan; Dib ayaan u eegay waxyaalaha ku qoran dalabkan; Dhammaan macluumaadka ku qoran dalabkayga iyo dhammaan dokumentiyada caddaynaya ee dalabkayga lala gudbiyey aniga ayaa bixiyey waana qaar dhammaystiran, run ah, oo sax ah; oo haddii laga kaalmeeyey dhammaystirka dalabkan, qofka iga kaalmeeyey sidoo kale dib ayuu iila eegay qiraalkan Ballanta Xarunta Taageerada Dalabka USCIS.

Waxa soo socdaa waa luuqadda bogga saxeexa elektarooniga ah. Waxaynu u baahanahay caalamiyeynta bogga marag-furka iyo saxeexa elektarooniga ah. Haddii adigoo og iyo aad ugu talo gashay been aad sheegtid ama aad qarisid runta alaab ama aad la gudbisid waraaqo been ah codsigaaga, racfaan, ama codsi, waxaan diideynaa codsigaaga, racfaankaaga, ama codsiga iyo laga yaabo in la diido faa'idooyinka kale ee socdaalka. Intaa waxaa dheer, waxaad

wajaheysaa ciqaabo adag ee sharciga uu bixyay iyo laga yaabo in ay quseyso dambi ku oogid dambi.

Bayaanka Dalbadaha

Ka dooro sanduuqa Lambarka Shayga 1.a. ama 1.b. Haddii ay khusayso, dooro sanduuqa Lambarka Shayga 2.

1.a. Waan akhriyi karaa oon fahmi karaa Ingiriisida, oo aan akhriyey oon fahmay su'aal iyo tilmaam kasta oo kusaabsna dalabkan, iyo sidoo kale jawaabtayda su'aal kasta. Waan akhriyey oon fahmay Qiraalka Ballanta Xarunta Taageerada Dalabka USCIS.

1.b. Tarjumaanka magaciisu yahay, {Magaca Hore ee Tarjumaanka} {Magaca Dambe ee Tarjumaanka}, waa iigu akhriyey su'aal iyo tilmaam kast dalabkan, iyo sidoo kale jawaabtayda su'aal kasta {Luuqadda la Tarjumay}, luuqad aan xariifka ku ahay. Waan fahamsanahay su'aal iyo tilmaam kasta dalabkan markii uu ii tarjumay tarjumaankaygu, waxaanan ku bixiyey jawaabo dhammaystiran, run ah, oo sax ah luuqadda sare ku xusan. Tarjumaanku {Magaca Hore ee Tarjumaanka} {Magaca Dambe ee Tarjumaanka}, sidoo kale wuxuu iigu akhriyey Qiraalka Ballanta Xarunta Taageerada Dalabka USCIS, luuqadda aan xariifka ku ahay, waanan fahamsanahay Qiraalka Xaruntan Taageerada Dalabka (ASC) sida uu ii akhriyey tarjumaankaygu.

2. Waxaan codsaday adeegyada oo aan oggolaaday {Magaca Hore ee Diyaariyaha} {Magaca Dambe ee Diyaariyaha}, kaasoo ah [kaasi oon ahayn] qareen ama wakiil sharci ah, inuu ii diyaariyo dalabkan. Qofkan iga kaalmeeyey diyaarinta dalabkaygu wuxuu dib iila eegay Qiraalka Ballanta Xarunta Taageerada Dalabka USCIS, waanan fahmay Qiraalka ASC.

Waxaan codsaday adeegyada oo aan oggolaaday {Magaca Hore ee Diyaariyaha} {Magaca Dambe ee Diyaariyaha}, kaasoo aan ahayn [UU1] qareen ama wakiil sharci ah, inuu ii diyaariyo dalabkan. Qofkan iga kaalmeeyey diyaarinta dalabkaygu wuxuu dib iila eegay Qiraalka Ballanta Xarunta Taageerada Dalabka USCIS, waanan fahmay Qiraalka ASC.

Caddaynta Dalbadaha

Nuqulada wixii dokumentiyo ah ee aan gudbiyey waa sawirrada saxda ah ee dokumentiyo aan la beddelin, oo asal ah, waanan fahamsanahay in USCIS ay u baahan karto inaan gudbiyo dokumentiyada asalka ah taariikh dambe. Intaa waxa dheer, waxaan oggolahay fasaxidda wixii macluumaad ka yimaada wax kamid ah ama dhammaan diiwaanadayda kuwaasi USCIS uga baahan karto go'aaminta dheefta socdaalka ee aan raadinayo.

Sidoo kale waxaan oggolaanaya fasaxidda macluumaadka ku qoran dalabkan, dokumentiyada caddaynta, iyo diiwaanadayda USCIS ee intitiska iyo dadka kale halka ay daruuri tahay shuruucda maamulka iyo socdkaalka Maraykanka.

Waxaan caddaynayaa, sida uu dhigayo xeerka ciqaabta been-abuurku, in macluumaadka ku qoran dalabkayga iyo wixii dokumenti aan la gudbiyey dalabkaygu aan anigu bixiyey oo ay dhammaystiran yihiin, run yihiin, oo sax yihiin.